



Ilaalinta xuquuqda iyo horumarinta nolosha Carruurta Maine

KIDS LEGAL waa mashruuc gobolka dhammaantiis ka jira oo ka mid ah Pine Tree Legal Assistance. Annagu waxaan ku takhasusnaa adeegyada wax ka qabadka baahida carruurta iyo dhalinta Maine ee dakhliga yar. Adeegyadayadu waa lacag la'aan.

Adeeggayagu:

- Waa inaan **wakiil** u noqono carruurta iyo dhalinta shaqsi ahaantooda ama iyada oo loo marayo daryeelayaashooda.
- Waa inaan kala **tashano** looyarda iyo adeeg bixiyeyaasha beesha arrimaha ku saabsan xuquuqda dhalinta Maine
- Waa inaan ku **tababbarno** kooxaha arrimaha sharciga ku lug leh ee saamaynta ku lug leh carruurta iyo dhalinta Maine ee dakhliga hoose leh
- Waa inaan **qorno** waxyaabaha macaamiishu wax ku barato ee ku saabsan xuquuqda dhalinta Maine

Kiisaska aan Qadanaa waa:

- arrimaha dugsiga oo ay ku jirto waxbarashada gaarka ah
- arrimaha sharci ee soo faad saara dhalinta cid la-socotaa ayna jirin
- manaafacaadka dawladeed ee loogu talagalay dadka aan qaan-gaarin
- Marin u-helidda adeegyada caafimaad ee loo baahan yahay
- arrimaha badbaadada ee ku lug leh sharciga qoyska qaarkood
- shaqada difaaca caruurta ee loogu talagalay dhalinta Dadka Mareykanka ee Dhulka loogu Yimid (juvenile defense work for Native American youth)

KIDS LEGAL ayaa isticmaasha arrin ku **abbaaritaan aqoon-badan** oo arrimaha sidii ay ugu bixin lahayd adeegyada sharciga carruurta Maine. Tan micnaheedu waa annaga oo la shaqeyna cilmi-yaqaanno aan arrimaha sharciga ku lug lahayn ee ay ka midka yihiin dhakhaatiir, macallimiinta, maareeyayaasha kiisaska iyo kuwa kale ee waliba la shaqeeya macaamisha -yada da'da yar. Waxaan u qabannaa arrintaas annaga oo aaminsan inay tahay dariiqa wax-ku-oolka ugu badan ee sidii loogu heli lahaa caarruurta caafimaad, badbaado, waxbarsho iyo dhaqaalaha natiijoyinkooda ugu fiican.

Dhalinta iyo daryeelayaashooda ayaa noo wici kara si toos ah, oo waliba annagu waxaan aqbalnaa u soo diritaanka ka yimaad adeeg bixiyeyaasha dhalinta arrimahooda ka shaqeeya. Haatan, annagu waxaan iskaashi la leenahay Isbitaalka Carruurta ee Barbara Bush (Barbara Bush Children's Hospital), oo waxaan u fidinaa gacan meelaha ay ku hoydaan dhalinta guri-la'aantu hayso ee ku yaal Bangor iyo Portland iyo dhalinta qolada Penobscot Nation (Penobscot Nation tribal youth).

Ka Fiiri Goobta aan ku Leenahay Shabakadda Internetaka: www.kidslegal.org

- macaluumad ku saabsan KIDS LEGAL
- kheyraadka loogu talagalay carruuta, dhalinta 13 illaa 19-jirka ah, dhalinta qaan-gaarka ah, waalidiinta iyo adeeg u bixiyeyaasha beesha ee ka jir Maine
- macluumaadka sharci ee ku saabsan xuquuqda dhalinta Maine

Nagala Soo Xiriir: 1-866-624-7787 (lacag la'aan)
P.O. Box 547 61 Main St,
88 Federal St. Room 41
Portland, ME Bangor, ME
207-774-8246 207-942-8241 x217